**Macluumaad muhiim oo loogu talogaley waalidiinta**

Waxaa aan rabnaa in aan qoraalkan ku wargalino waalidiinta macluumaad ku saabsan sida ay dugsiyada xanaanada carruurtu uga shaqeeyaan hawlaha looga hortagayo dabeecadaha meel ka dhaca ah. Waxaa aan ka shaqeynaa in uusan ilmona u baahan in lagu xadgudbo ama uu isagu cid kale ku xadgudbo!

Dugsiyada xannaanada carruurtu waxaa loo xilsaaray in ay ka shaqeeyaan bey'ad ka madax bannaan xadgudub, takoorka iyo tacadi.

Nidaamyada khuseeya arimahan waxaa laga heli karaa!

- Heshiiska caalimjaga ah ee xuquuqda carruurta
- Sharciga arimaha waxbarashada cutabka 6-aad, ee dhaqan galey sanadkii (2008:800)
- Sharciga ka hortaga takoorka ee dhaqan galey (2008:567, ee la bedeley 2014:985)
- Manhajka waxbarashada dugsiyada xanaanada carruurt Lpfö18

Waa in uu dugsi kasta oo xanaano lahaada qorshe u degsan oo sharxaya sida looga hortagayo iyo taloobiyinka lagu dhiirigalinyo ka hortaga xadgudubka, takoorka iyo tacadiyada iman kara. Qorshaha degesan waa in lagu dhajiyo gidaarada dugsi kasta oo xanaano, waa in sidoo kale lagu daabaco bogga internetkaee degmada.

Qeyb muhiim oo ka mid ah hawlaha uu dugsiga xanaanada carruurta uga hortagayo waa in qaybaha kala duwan ee shaqaalaha ay sameeyaan baadhitaan sanad kasata xili dugsiyeedka deyrta isla markaana ay dejiyaan yool la hiigsado. Yoolka waa in la tix raaco bil kasta isla markaana la qiimeeyo sanad kasta xiliga gu'ga. Haddii aad qabto waxa su'aal ah oo ku kusaabsan yoolka ay qaybyt hiigsaneyso waad na weydiin kartaa.

Waxaa aan sidoo kale sanad kasta u diranaa waalidiint foom su'aalo ah. Jawaabta ka soo baxda foomka su'aalaha waxa uu naga caawiyaa in aa qiimeyn ku sameyno manhajka waxbarashada ee dugisiga xanaanada carruurta! Su'aalha ku qoran foomka waxaa ka mid aha "*In shaqaalha ka sahqeeya dugsiga xanaanada carruurta ay si firfircoon uga shaqeeya ka hortagga xadgudubyada*" iyo sidoo kale "in shaqaalaha ka shaqeeya dugsiga xanaanada carruurta ay si firfircoon kor u qaadaa in carruuta oo dhan ay simanyihiin isla markaana isku qiimo yihiinn". Sanadkii 2019 waxaa qaar badan oo tirsan waalidiinta ay kaga jawaabeen su'aalahan jawaabta ah "ma ogi". Sanadkii 2020 waxaa aan araganey in tirada waalidiinta ku jawaabtey "ma ogi" ay hoos u dhacdey, laakiin waxaa wali noo muuqta i ay jirto baahi ah in aan idin wargalino arimaha ku saabsan hawlaha la qabto ee la xidhiidha arimaha sinaanshaha.

Dugsiga xanaanda carruurta ee Tibros waxaa aan ku shaqeynaa hab dhaqan ah in aan <u>haba yaraatee loo dulqaadan</u> takoorka iyo in cid lagu xadgudbo. Ilmaha sheega ama muujiya in uu dareemayo in lagu xadgudbey, xanaaqsan, cadhooya ama dhawaacmey, waa in marwalba loo arkaa ama loo qaato si dhab ah. Xaalad kasta oo noocan oo kale ah waa in ay jawaabteedu noqotaa in ay fal celin degdeg ah ka bixiyaan shaqaaluhu.

Qof kasta oo ka tirsan shaqaalaha ee ka war hela in ay suuto gal tahay in uu dhacey fal xadgudub, takoor ama tacadi ah, waxaa waajib ku ah sida ku xusan sharciga dugsiyada waxbarashada in uu ku wargaliyo maamulah dugsiga. Warbixinta waxaa lagu sheegayaa oo kaliya magaca ilmaha dareemaya in lagula kacey fal xadgudub, looma baahno in lagu soo hadal qaado dadka kale ee ku lugta leh arinkan. Waxaa maamulaha markiida saaran waajib ah in uu u sii gudbiyo warbixinta milkiilaha dugsiga xanaanda carruurta. Waxaa ay tani macnaheeddu tahay in gudida carruurta iyo waxbarasha ee degmada ay helaan liiska tirada dacwooyinka laga soo gudbiyey dusiyada xanaanada carruurta. Guddigu waxaa ay sannad walba codsataa warbixinno aan kala sooc lahayn si loo qiimeeyo sida ay u socoto hawlaha sida ay dugsiyada xananada carruurta uga shaqeeyaan hawla ka hortaga xadgudubka. Markaa ka dib waxaa uu maamulaha isaga oo la tashanaya shaqaalaha dugsiga xanaanada carruurta si degdeg ah u bilaabi doonaa baadhitaan ku saabsan dhacdadii dhacdey isla markaana waxaa la qaadi doona taaloobiyin ku saabsan sida looga hortagayo in uu xadgudub mar kale dib u dhaco.

Haddii aad ka waalid ahaan dareentid welwel ama aad fiiro gaar ah u yeelato nooc ka mid ah xadgudubyada, takoor ama tacadi waxaa haboon in aad la xidhiidho shaqaalaha ka shaqeeya dugsiga xanaanada carruurta. Haddii aad

dareento in shaqaalaha laftoodu ay ku lug leeyihiin xadgudub, takoor iyo tacadi fadlan la xidhiidh maamulaha mas'uulka ka ah.

Waxaa aan rabnaa in aan halkan ku cadeyno, **in aysan aheyn ilmaha cida laga gudbinayo warbixinta haddii uu fal xadgudub meesha yimaado, waxaa ay warbixintu ku wajahantahay in dugsiga xanaanada carruurta uu qiimeyn iyo baadhis ku sameeyo nidaamka iyo qaab hawleedkooga si looga hortago in fal xadgudub uu mar kale u dhico. Ujeedada loo gudbinayo warbixinada waa in la xoojiyo hawlaha ka hortaga xadgudubka ee dugsiga xanaanada carruurta. Hawsha aan u xil saaranahay waa in aan siino taageerada ay u baahanyihii dhibanaha iyo cida dhibka geystaey labadaba**.

Ha ka gaban in aad weydiiso shaqaaalha ka shaqeeya dugsiga xanaanada carruurta ama maamulaha mas'uulka ka ah haddii aad qabto wax su'aal ah!

Emelie Ahlén Karlsjö, Bånita Kron, Therese Lundmark, Christopher Nilsson
Kooxda maamulka dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta (Förskolans ledningsgrupp)

-----------------------------------------------------------------------------------------------

QeexitaanadaDefinitioner:

Macnaha eryega takoorid waa in ilmo yar la dayaco ama loola dhaqmo si xaq daro ah sababo la xidhiidha kuwan hoss ku xusan: jisigiisa, jinsiga uu ilmuhu isku aqoonsanyahay ama isku muujiyo (könsöverskridande identitet eller uttryck), isirka uu ka soojeed, diinta caqiidada kale ee uu aaminsanyahay, jinsiga uu xiiseeyo in uu la galmoodo (sexuell läggning), naafanimadiisa ama da'diisa.

Tacadigu waa ficil ay geystaan shaqsiyaad, kaas oo meel ka dhac ku ah sharafta ilmaha iyad oo laga tilmaan qaadanayo mid ama qaar badan oo ka mid ah tiirarka takoorka.

Dahaqanka xadgudubka waxaa uu macnihiisu yahay in meel lagaga dhaco sharafta ilmaha, laakiin dhaqanka xadgudubka wax xidhiidha lama laha aasaaska ama tiirarka takoorka. Qofka dareemey in lagu xadgubey ayaa qeexaya waxa uu yahay xadgudubka uu u arko lagula kacey. Carruurta aadka u yaryar suurogal uma aha in ay dareenkooda muujiyaan si la mid ah sida ay carruurta yara waaweyn iyo dadka waaweyn u muujin karaan dareenkooda sidaa aawadeed waxaa maraxaladaha noocan oo kale loo baahanyahay in shaqaaluhu ay fasiran karaan iyaga oo tusaale ahaan ka tilmaan qaadanaya luqada jidhka (kroppsspråk) ee ilmaha.